

Xisaab

Xisaabta waa qayb aad u muhiim ah oo nolasha maalin walba ka mid ah. Iskuulka St Mary's waxaan aamin sanahay inay caruurta meel sare ka gaarayaan barashada xisaabta, hadii ay barashada xisaabta ay ku farxaan caruurta oo ay sifiican oo farxad galinaysa loo baro. Caruurta waxay qaataan hal sac xisaab ah maalin walba, maadooyinka kalana way ku dhex qaataan xisaabta.

Waxaa jira 4 fure oo xisaabta lagu barto:

Isticmaalid iyo ku dhaqmid

Nambarka

Qaab iyo meel uyaal (makaan)

Maclumadka xisaabta sida lola dhaqmo

Ciyaalka waxa ay ushaqeeyaan oo ay wax ku bartaan qayb qayb, qof qof ama fasalka oo dhan, waxaana isla markaas caawinaya qof wayn iyo waliba si madax banana way ushaqeey nayaan.

Waxaa jira fursado badan ay ciyaalka ku sameeyaan sida loo xaleeyo mashaakilka, taas oo ah mashaakilka nolasha ka dhaca, waxay kaloo taas ku caawinaysaa in ay bartaan sida xisaabta loo xaleeyo, waxaana taas ku tusnaa dariiqado badan oo jeclaysiinaya ciyaalka inay xisaabta jeclaadaan. Iskuulka St Mary's waxaan ciyaalka barnaa in ay isla shaqeeyaan, waxaana ku dhiira galinaa inay laba laba uwada shaqeeyaan ayna isla hadlan.

Ciyaalka imtixaano ayaa laga qaadaa mar walba kaas oo ku salaysan wixii ay macalimiinta iyo macalimiin caawiyaha ay u arkaan in ay ciyaalka ay awoodaan in ay sameeyaan.

Ciyaalka sida ay wax ubartaan iyo sida ay u hormareen waa la ilaaliyaa oo meel lagu qoraa, waxbariduna waxay ku

**xiran tahay heerka caruurta ay ubaahan yihiin in
tacliintoodu la gaarsiiyo.**